

Sababta Qoyskaaga Ugu Baahan Yahay Tallaalka

Tallaalladu waxay adiga iyo dadka aad jeceshahay ka difaacaan cudurrada halista ah.

Cudurrada sida jadeecada, busbuska iyo xiiqdheertu waa cudurro halis ah oo dadka ka dhigi kara kuwo si daran u xanuunsada. Tallaalladu waxay na siinayaan hab ammaan ah oo wax-ku-ool ah oo aan nafteena iyo qoysaskeenna uga ilaalin karno cudurradan. Tallaalladu waxay jirka geliyaan nooc daciif ah ama la dilay oo ka mid ah jeermiska, fayraska ama bakteeriyada. Tani waxay jirka bartaa sida loo aqoonsado cudurka oo uu isaga difaaco. Tallaallada badankood jirka ayaa lagu mudaa, halka qaar kalena sanka ayaa lagu buufiyaa ama afka ayaa laga qaataa. Marka tallaalka la qaato ka dib, waa caadi in la dareemo saameynno fudud. Waxaa ka mid ah xanuun ama guduudasho meesha tallaalka lagaa muday, daal, qandho, madax-xanuun ama lalabbo. Saameynahaasi waa caadi, waxayna muujinayaan in jirku shaqaynayo si uu u dhiso difaac uu cudurka kaga hortago. Xasaasiyadda daran ee ka dhalata tallaalka waa mid aad u dhif iyo naadir ah. Haddii ay dhacdo, isla markiiba la xiriir bixiyaha adeegga caafimaadka. Tallaalladu cudur ma sababi karaan.

Goorma ayay tahay in qoyskaygu qaato tallaallada?

Tallaalladu waa mid ka mid ah hababka ugu muhiimsan ee aan u haysanno ilaalinta caafimaadkeenna. Tallaallo kala duwan ayaa lagu taliyaa da’aha iyo marxaladaha kala duwan ee nolosha, sida xilliga uurka, iyadoo lagu salaynayo khatarta qofka ugu jiro inuu qaado cudur. Waa muhiim in tallaalka lagu qaato waqtigiisa.



Eeg Jadwalka Tallaallada carruurta laga bilaabo xilliga dhalashada ilaa ay ka gaaraan 6 sano jir
https://www.healthychildren.org/English/safety-prevention/immunizations/Pages/Recommended-Immunization-Schedules.aspx
Eeg Jadwalka Tallaallada carruurta waaweyn iyo kuwa qaangaarka ah ee da’doodu u dhaxayso 7 ilaa 18 sano
https://www.healthychildren.org/English/safety-prevention/immunizations/Pages/Recommended-Immunization-Schedules.aspx
Eeg Jadwalka Tallaallada Dadka Waaweyn
https://www.aafp.org/clinical-insights/immunizations-and-vaccines/immunizations-schedules-resources/adult-immunization-schedules
Waxaa jira tallaallo qaar oo ay tahay in la qaato xilliga uurka. Tallaalladani waxay ilaaliyaan hooyada, waxayna ilmaheeda u gudbiyaan unugyada difaaca jirka ee la dagaallama cudurrada, kuwaas oo ilmaha ka ilaaliya cudurrada bilaha ugu horreeya noloshiisa, ka hor inta uusan gaarin waqtiga tallaalka. Wax badan ka baro tallaallada lagu taliyey in la qaato xilliga uurka
https://www.acog.org/clinical-information/maternal-immunization-schedule

Tallaalladu waa shuruud looga baahan yahay carruurta dhigata dugsiyada iyo xarumaha xannaanada carruurta

Tallaalladu waxay carruurta u suurtageliyaan inay sii dhigtaan dugsiga. Marka carruurta la tallaalo, waxaa yaraanaysa suurtagalnimada inay dugsiga ka maqnaadaan sababo la xiriira xanuun. Tani waxay sidoo kale ka caawisaa waalidiinta inaysan shaqada uga maqnaan sababo la xiriira daryeelka carruurta xanuunsan. Gobolka Colorado, tallaallo gaar ah ayaa looga baahan yahay carruurta si ay u dhigtaan dugsiga iyo xarumaha xannaanada carruurta. Cudurrada sida jadeecada waxay si dhakhso ah ugu faafi karaan meelaha ay isugu yimaadaan dad badan. Waa muhiim in la hubiyo in heerka carruurta laga tallaalay ee dugsiyada iyo xarumaha xannaanada carruurta uu sarreeyo. Tani waxay ilaalinaysaa caafimaadka dhammaan ardayda, shaqaalaha dugsiga, iyo xitaa xubnaha kale ee bulshada.

Waa kuwee tallaallada looga baahan yahay carruurta si ay u galaan dugsiyada iyo xarumaha xannaanada carruurta ee Colorado?

Dugsiga

Tallaallada looga baahan yahay waxaa ka mid ah tallaalka cagaarshowga nooca B, tallaalka gawracatada, teetanada iyo xiiqdheerta (DTaP), tallaalka fayraska dabaysha ee aan noolayn (IPV), tallaalka jadeecada, qaamo-qashiirta iyo rubella (MMR), tallaalka busbuska, iyo tallaalka teetanada, gawracatada iyo xiiqdheerta (Tdap)

Childcare

Tallaallada looga baahan yahay xannaanada carruurta waxaa ka mid ah tallaalka cagaarshowga nooca B, tallaalka gawracatada, teetanada iyo xiiqdheerta (DTaP), tallaalka nooca b ee Haemophilus influenzae (Hib), tallaalka fayraska dabaysha ee aan noolayn (IPV), tallaalka pneumococcal conjugate (PCV13 ama PCV15), tallaalka jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeecada Jarmalka (MMR), iyo (tallaalka busbuska)

Xaggee ayaan ka heli karaa tallaallo kharashkoodu yar yahay ama bilaashka ah?

Waaxda Caafimaadka Dadweynaha iyo Deegaanka ee Colorado (CDPHE) waxay bixisaa adeeg lagu heli karo macluumaadka bixiyeyaasha tallaallada bilaashka ah ama kharashkoodu yar yahay, kaas oo laga heli karo: COVax4Kids.org. Immunize Colorado waxay la kaashataa waaxyaha caafimaadka dadweynaha ee deegaanka ee aagga Denver si loo bixiyo adeegyo tallaal oo bilaash ah ama kharashkoodu yar yahay, iyada oo loo marayo barnaamijka Shots for Tots and Teens. Dhammaan tallaallada lagu taliyey waxaa heli kara carruurta da'doodu u dhaxayso 0 ilaa 18 sano, inta badan xarumaha tallaalkuna waxay bixiyaan tallaallada dadka waaweyn. Booqo ShotsForTotsAndTeens.org si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Ma u baahan tahay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tallaallada?

LKa raadso diiwaannada tallaalladaada, kuwa ilmahaaga ama qaraabadaada ee ku jira mareegta CDPHE. Waa bilaash waana sahlan tahay. Waxaad u baahan tahay oo keliya magacaaga iyo taariikhda dhalashadaada.

Ama, macluumaad dheeraad ah oo ku qoran afka Soomaaliga ka hel bogga internetka ee ImmunizeColorado.org/Resources/.